

**War-bixin ku Saabsan Waxbarasho  
Si Buuxda Iskoolka loo Imanayo  
& Midda ah Virtual Learning  
Ee Ardayda Dugsiyada Sare**



**Saint Paul**  
PUBLIC SCHOOLS

# So Dhaweynta Dhammaan Ardayda Fasallada u Imaanayo Qof Ahaanta



- Waxbarashada qof ahaanta iskoollada la imaanayo u billowdo dhammaan ardayda fasallada 6-12 ee rabo waxbarashada laga billaabo Arbacada, April 14.
- Ardayda si shaqsi ah wax u barata waxay joogi doonaan dugsiga 4.5 saacadood Isniinta ilaa Khamiista **10:30 AM ilaa 3:00 PM**
- 2 saacadood ee shaqada iskoollada lagu dhammayn doono guriga
- Maalmaha Jimcaha waxay ardayda oo dhan u noqon doonaan maalmo ay qaataan waxbarashada durugsan, taasoo ay ku jiri karaan saacadaha shaqada oo la la kulmi karo macallimiinta marka lagu daro wakhtiga uu ardaygu qabanayo shaqo uu keligiisa u qabanayo si madax bannaan.
- Barnaamijyada waxbarashada gaarka ah ee Federal III waxay raaci doonaan jadwalkooda caadiga ah ee iskoollada sida buuxda u furan shan maalmood toddobaadkii.



# Doorashada Waxbarashada Khadka Intarnetka (Virtual Learning)



**In guriga oo wax lagu sii barto Isniinta ilaa Jimcaha**

- WAA IN la isqoraa ugu dambeyn Khamiista, March 11
- Isdiiwaangeli xitaa haddii aad horey isugu qortay iskoolka Virtual Learning School ama doorbidday inaad ka baxdid barnaamijka caawinta waxbarasho ee qof ahaaneed ee iskoolka ka socdo
- Ardayda doorata waxbarashada khadka intarnetka waxay ku sii jiri doonaan waxbarashada khadka intarnetka inta ka hartay sannad-dugsiyeedka

# Dhammaan Ardayda

- Ardayda kusii nagaan doonaan iskoolladooda ay hadda dhigtaan iyo fasallada ay hadda dhigtaan iyagoo la joogayo macallimiintooda hadba intii suurtagal ah.
- Ardaydu waxay sii wadayaan inay dhammaystiraan casharrada ku jiro Schoology iyagoo isticmaalayo iPad-kooda
- Caawinta casharrada:
  - Macallinkooda kala hadal
  - Wac macallimiinta maaddada ku takhasusay ee online ahaan laga helo barta [TutorMe](#) xilligaad doontid
  - Tag [Xarunta Caawinta Waxbarashada](#) ee Gordon Parks, Isniinta ilaa Khamiista 3:30 pm ilaa 6:30 p.m.



# Ardayda Qof ahaanta Iskoolka u imaneyso



- Jadwalka basaska ayaa boostada laguugu soo diri doonaa laga billaabo March 29
- Basasku waxay dib u billaabi doonaan inay soo istaagaan goobahoodii caadiga ah (ma ahan xarumaha bulshada sida goobaha qof ahaanta ardayga loo caawinayo)
- Wejiga oo la daboollo ayaa la iska doonayaa



- Ardaydu waxay heli doonaan quraac iyo qado bilaash ah oo cunto baakadeysan ah
- Ardayda ayaa loo qoondeyn doonaa kuraas gooni u ah inta lagu jiro wax cunidda iyo inay taas naga caawiso qaabkii loola xiriiri lahaa ardayda iska ag dhow fadhi ahaan iyo kala fogaanshaha bulshada

# In-Person Students



	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday
10:30 - 11:55	Period 1 (class = 55 mins, lunch = 30 mins)	Period 5 (class = 55 mins, lunch = 30 mins)	Period 1 (class = 55 mins, lunch = 30 mins)	Period 5 (class = 55 mins, lunch = 30 mins)
12:00 - 12:55	Period 2	Period 6	Period 2	Period 6
1:00 - 1:55	Period 3	Period 7	Period 3	Period 7
2:00 - 2:55 (stagger dismissal from 2:55-3:00)	Period 4	Advisory/ Independent Work Time	Period 4	Independent Work Time in Advisor's room

\*55 min classes \*5 min passing time



# Ardayda Waxbarashada Khadka Intarnetka (Virtual Learning)

- Saacadaha debecsan ee loogu talagalay ka shaqeynta casharrada
- Casharrada waxaa badankooda la qaataa iyadoo ay kala maqan yihiin macallinka iyo ardayga
- Saacadda maalinlaha ah ee xafiiska macallinka adigoo la xiriirayo wakhtigan: **8:15 AM ilaa 10:15 AM**
- Xiriirka macallinka ee Jimcaha
- Caawinaadda duruusta inta lagu jiro saacadaha uu ardaygu goobta joogo:
  - Wac macallimiinta maaddada ku takhasusay ee [TutorMe](#) laga helo



# Virtual Learning Students



Monday-Thursday:

8:15am to 10:15am

Attend Office Hours for instructional support

10:15am to 3:00pm

Asynchronous Independent Learning

Friday: 8:15am ilaa 3:00pm

Attend Office Hours for instructional support

Asynchronous Independent Learning



# Isbarbardhigga Waxbarashada Qof ahaaneed iyo Midda Khadka Intarnetka (Virtual)



## Waxbarashada Qof ahaanta la Imanayo Iskoolka

Ardaydu waxay wax ku baranayaan fasalka gudihiisa iyaga iyo macallimiintoodba iyagoo raacayo jadwal la gaabiyay Isniinta ilaa Khamiista. Ardaydu waxay wax ku bartaan iyagoo jooga guriga maalmaha Jimcaha.

Wakhtiga fasalka la joogo waxaa la helayaa duruus cusub iyo caawinta ardayda

Laba saacadood oo waxbarasho uusan macallinku kula joogin guriga lagu sameynayo Isniinta ilaa Khamiista

Macallimiintu waxay ardayda xaadiriyaan Isniinta ilaa Khamiista; maqnaanshaha waa in la soo sheego

Ardaydu waxay sii wadayaan inay dhammaystiraan casharrada ku jiro Schoology iyagoo isticmaalayo iPad-kooda

Ardaydu way u wareegi karaan waxbarashada khadka intarnetka (virtual) inta ka harsan sannad-dugsiyeedka



## Waxbarashada Khadka Intarnetka (Virtual)

Ardaydu waxay wax ku bartaan guriga maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha

Duruusta waxaa badankooda la qaataa iyadoo ay kala maqan yihiin macallinka iyo ardayga

Macallimiintu waxay maalintii haystaan hal saac oo loogu talagalay saacadaha xafiiska iyo caawinta ardayda online-ka wax ku barata

Ardaydu waxay iska xaadiriyaan aaladda Campus

Ardaydu waxay sii wadayaan inay dhammaystiraan casharrada ku jiro Schoology iyagoo isticmaalayo iPad-kooda

Ardayda doorata waxbarashada khadka intarnetka waxay ku sii jiri doonaan waxbarashada khadka intarnetka inta ka hartay sannad-dugsiyeedka

# Tallaabooyinka Caafimaadka iyo Bedqabka

- **Kala-fogaanshaha Dadweynaha:** Marka aysan 6 tallaabo suurta gal ahayn, **ugu yaraan fogaansho ah 3 tallaabo oo u dhaxeysa ardayda ayaa la sameyn doonaa.**
- **Kordhinta jeermis-nadiifinta maalinlaha ah:** Shaqaalaha nadaafadda waxay mudnaanta siinayaan meelaha taabashada badan sida gacanta albaabbada, batoonada nalka laga daaro, biraha la cuskado ee ku teedsan iskoolka, miisaska iyo musqulaha. Xaashiya biliijka ka qoyan ee wax lagu masaxo iyo jeermis-dileyaal dhalo laga buufiyo ayaa loo heli karaa shaqaalaha goobta.
- **Daboolidda wejiga:** Ardayda fasallada K-12, shaqaalaha iyo booqdayaasha waxaa looga baahan yahay inay xirtaan gafuur-xir haddii aan looga reebin xaalad caafimaad ahaan. Kuwo dheeraad ah ayaa laga heli karaa iskoolka iyo baska haddii loo baahdo.
- **Baaritaanka Caafimaadka:** Qoysasku waa inay sameeyaan baaritaan caafimaad subax kasta ka hor intaan ardaydooda loo dirin iskoolka ama goobta baska laga raaco. **Hadday jiran yihiin, waa inay guriga joogaan oo ay soo sheegaan maqnaanshaha.**

# Habka Soo-sheegidda COVID-19

- Habka Soo-sheegidda COVID-19
  - Haddii ardaygaagu jiran yahay ama ka ag dhowaaday qof kale oo laga helay xanuunka COVID-19, **ha u soo dirin iskoolka**. Wixii maqnaansho ah u soo sheeg iskoolka ilmahaaga, oo isla maalintaasba warbixin u soo gudbi bogga Nidaamka Warbixinta ee COVID-19 si aad u ogaatid tallaabooyinka xiga ee aad qaadeysid.
  - Ardeyda lagu arko calaamadaha COVID-19 iyagoo joogo iskuulka, meel gooni ah ayaa lagu haynayaa (laguna ilaalinayaa) ilaa ay waalidkood u yimaadaan. Qaadista degdegga ah ee ilmaha waa muhiim.
- Markuu kiis xanuun ah ka jiro iskoolka, [Borotokoolka Isgaarsiinta ee COVID-19](#) ayaa la raaci doonaa si loo go'aamiyo nooca ogeysiis ee loo baahan yahay
- Ardayda ku jirto karantiilka waxay mar kale billaabi doonaan waxbarashada durugsan ka hor intaan loo fasixin inay soo noqdaan

**SPPS COVID-19**  
Reporting System



**Saint Paul**  
PUBLIC SCHOOLS

# MUUQAAL: Ku Caawi in Degmada SPPS u Furnaato si Bedqab leh



# Su'aalo?



**Saint Paul**  
PUBLIC SCHOOLS